



## Sida Loogu Doodo Daryeelka Carruurta U Doodistaada ee Daryeelka Carruurta Waa Muhiim

Kumanaan ah qoysaska Washington ayaa ku tiirsan barnaamijyada daryeelka carruurta si waalidiintu u shaqo tagi karaan iyagoo og in carruurtoodu ku nabad qabaan goobaha waxbarashada hore. Daryeelka carruurta waa qayb muhiim ah oo ka mid ah dhaqaalaheena. La'aanteeda, waalidiintu ma shaqeyn karaan ganacsiyadana ma hawlgali karaan. Sidaas ay tahayna maalgelin yar ayaa ka jirta Washington si loo taageero adeegaan muhiimka ah.

### Xarunteena Waxqabadka U doodista Ayaa Fududeynaysa

Waxaad si sahlan ah farriin ugu diri kartaa sharci-dejiyayaashaada adigoo u marinaya Xarunta Waxqabadka U doodista ee Child Care Aware ee Washington. Tag <https://childcareawarewa.org/advocacy/take-action/> si aad u wadaagto sheekadaada daqiiqado.

Waligeed ma jirin waqti ka muhiimsan hadda oo waalidiinta, adeeg-bixiyayaasha daryeelka carruurta iyo taageerayaasha waxbarashada hore inay sharci dejiyayaasha u sheegaan sida ay muhiim u tahay daryeelka carruurta. Waa sida tan sida aad codkaaga kor ugu qaadi karto si aad ugu dooddid daryeelka carruurta:

#### 1 Raadi sharci dejiyahaaga

Haddii aadan horey u ogeyn cidda ay yihiin sharci-dejiyayaashu, way fududahay in la ogaado. Qof kasta oo ku nool Washington wuxuu leeyahay hal Senetar oo Gobol iyo laba Wakiillo Gobol kuwaas oo dejiya una codeeya sharciyada gobolka. Booqo <https://app.leg.wa.gov/districtfinder/>, ku qor cinwaankaaga ka dibna guji magaca sharci-dejiye kasta si aad u aragto macluumaadka xiriirkooda.

Sharci-dajiyayaasha qaarkood waxay yaqaanaan muhiimadda daryeelka carruurta iyo waxbarashada hore ay leeyihiin, hase yeeshee inta kale ma oga. Taasi waa sababta codkaagu aad muhiim ugu yahay. WAXAAD noqon kartaa qofka ka caawiya sharci dejiyahaaga inuu fahmo sababta daryeelka carruurta ay muhiim u tahay adiga, qoyskaaga, loo shaqeyahaaga iyo dhaqaalaheena.

#### 2 La wadaag sheekada daryeelka ilmahaaga

Markii aan wadaagno sheekooyinkeenna waxaan ka caawinnaa sharci-dajiyayaasha inay si wanaagsan u fahmaan arrimaha muhiimka u ah dadka soo doortay, waxaan ka caawinnaa inay xusuustaan sababta ay arrin muhiim u tahay. Xaqiiji inaad ka jawaabto su'aalahan muhiimka ah markasta oo aad la xiriirto sharci-dejiye:

- Qofka aad tahay iyo aragtida aad dhiibanayso (bixiyaha daryeelka carruurta, macaamiisha daryeelka carruurta, iwm.)
- Halka aad ka soo jeedo (Ma waxaad ka socotaa aagga laga soo doortay mise maya?)
- Maxay yihiin waxa aad ka codsanayso sharci dejiyuhu inuu sameeyo (maalggelinta daryeelka carruurta, u codeynta siyaasadaha u roon qoyska, iwm)
- Waa maxay sababta daryeelka ilmaha iyo waxbarashada hore ay muhiim u yihiin-sheekadaada gaarka ah iyo khibradaada ku aadan daryeelka carruurta

Xusuusnow, sharci-dejiyayaashu ADIGA AYAY KUU SHAQEEYAAN tanina waa sheekadaada ah in la sheego.

#### 3 Dir fariintaada

Waxaad fariintaada ku wadaagi kartaa iimayl, taleefan ama adigoo boostada warqad ku diraya. Sharci dejiyayaasha qaarkood waxay leeyihiin foomam fudud oo khadka tooska ah lagu buuxin karo. Kuwo badan ayaa lagula xiriiri karaa warbaahinta bulshada, oo ay ku jiraan Twitter iyo Facebook.

